




Wixii kusoo cusboonaaday howlihii dib-u-dejinta ee xaafada Richmond

In ka badan 30% kiraystayaasha degan 139 Highett Street iyo meelaha kor loogu socdo oo aan doonayno in dib loogu habeeyo waxaa la dhamaystiray Febraayo 2026.

Weli waxaan taageeraynaa inta ka harsan deganayaasha talaaba kasta oo la qaadayo.

Jadwalka dib-u-dejinta

139 Highett Street iyo meesha kor loogu socdo ee Elizabeth Street, Williams iyo Anderson Courts



Maalinta Macluumaadka Adeegyada Taageerada

La kulan ururada maxaliga ah ee taageerada siinaya kireysteyaasha dib-u-dejinta loo sameynayo

Arbacada 22-ka bisha Oktoobar 10-ka subaxnimo ilaa 2:30-ka galabnimo

North Richmond Community Hub (110 Elizabeth Street)



In wax kasta la idinla soo socodsiiyo



Kulamada la isku xog wareysanayo



Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga



Isdiwaangeli si aad ula socoto wixii soo cusboonaado


Si aad wax kasta ula socoto booqo:



homes.vic.gov.au/richmond-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi
Homes Victoria



Somali | Soomaali



BIG HOUSING BUILD

Oktoobar 2025

Richmond

Wixii soo cusboonaaday ee loogu talagalay Bulshada

Waxa ka socda goobta

144 Guri oo cusub oo Degaan oo la dhisayo

Dadka guryaha degan ayaa waxay bilaabeen inay u guuraan guryo cusub oo ku yaal Elizabeth Street.

Taageerada loogu talagalay dadka kirada ugu jira guryaha ee dib-u-dejinta loo sameynayo

Dib-u-dejinta Richmond ayaa meeshii la rabay maraya waxaana la dhamaynayaa bisha Febraayo 2026.

Cusboonaysiinta dhulka ayaa la dhameystirayaa

Meelo cusub oo dhirta lagu beero iyo dariiqyo la jeexay oo loogu talagalay Xarumaha Caafimaadka Bulshada ee Waqooyiga Richmond.

Guryo cusub oo ku yaal Elizabeth Street

soo bandhigida naqshadaynta bulshada iyo xaafad soo jiidasho leh.



Waxyaabaha la qaban doono mustaqbalka

106, 108, 110 iyo 112 Elizabeth Street.



Dayactirka meelaha dhirta lagu beero ee dibada oo heer gebogebo ah maraya, iyo shaqo laga hayo baarkinada baabuurta la dhigo

Rakibista mukeyfyada ayaa loo bilaabi doonaa guryaha mudnaanta leh



Howlaha dayactirka

Dhamaan guryaha ku yaal 72-76 ee church street



Qorshayn ayaa socota

Meel cusub oo dadka lagu dejin karo oo uu iskuulku yeelanayo



Dhammaystirka howlaha



Rakibida deyr dheeraad ah



Meelo cusub oo dhirta lagu beero iyo dariiqyo la jeexay oo loogu talagalay Xarumaha Caafimaadka Bulshada ee Waqooyiga Richmond



Qorshayn ayaa socota

Dayactir lagu sameynayo barxada lagu ciyaaro Kubadda Kolayga



Dadka oo guryaha kusoo guuraya

147-161 Elizabeth Street

144 guryo dowlad oo cusub iyo goobo bulsho



Kiraystayaasha ayaa hada dib-u-dejin loo sameynaya

139 Highett Street iyo meesha kor loogu soconayo ee Elizabeth Street iyo Williams iyo Anderson Courts

Taageerada la siinayo kiraystayaasha loo sameynayo dib-u-dejinta:

9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo Talaado, Arbaco iyo Khamiist kasta

112 Elizabeth Street

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha

Xarunta Bulshada ee Waqooyiga Richmond ee ku taal 110 Elizabeth Street

Howlaha shaqo



Kormeeritaan ayaa lagu sameyn doonaa guryaha la faaruqiya



Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah



Waxyaabaha aan loo baahnayn oo laga saari doono guryaha la faaruqiya

Oktoobar 2025

Shaqooyinka iyo xafladaha soo socda ee ka dhici doona Richmond

Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.

Waxaa laga yaabaa inaad aragto:

- Qaar ka mid ah shaqaalaha ayaa goobta ku sugnaan doona sidoo kalena waxaa jiri doona shanqadh yar maadaama mukeyfyo lagu xirayo guryaha qaar
- Gawaari waaweyn oo goobta ka saari doonta waxyaabaha aan loo baahneyn ee yaal guryaha la faaruqiya
- Shanqar yar oo qeylo ah oo la maqli doono maadaama guryaha la faaruqiya qaar la baari doono lana sugi doono
- Baabuurta caasiyada ah ee ku baarkin gareysan Elizabeth Street iyo Lewis Court oo laga kaxayn doono meesha maadaama ay dadka goobta degan u guurayaan guryo cusub.

Wax howlo shaqo oo wax dumis ah ma dhici doonaan inta dhismayaalka la degan yahay.



Saacadaha shaqada caadiga ah ee magaalada Yarra

Isniin ilaa Jimce inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo

Sabti inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah hala xidhiidhaan xafiiska guryaynta ee deegaankooda:



1300 36 462



richmond.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaar waxaa loo baahan doonaa fasax laga heysto golaha deegaanka si howlaha shaqo looga qabto saacadaha ka baxsan xilliyadaas balse waanu la socodsiiin doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.

Jadwalka howlaha shaqo ee la qaban doono intaan wax la dumin

139 Highett Street iyo meelaha kor loogu soconayo ee Elizabeth Street iyo Williams iyo Anderson Courts

Halkan ayaan joognaa



1. Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan



Sugidda guryaha bannaan



Kormeerka goobta iyo dhismayaasha si loo maareeyo agabka si badbaado leh



Joogtaynta dayactirka joogtada ah



Bilowga sanadka ilaa badhtamaha 2026



2. Diyaargarowga

- Diyaarinta goobta iyo in calaamadaha meel kasta lagu dhajiyo si loo xaqiijiyo badbaadada
- Hubinta isku xirka adeegga
- Meesha laga galo in laga dhigo mid badbaado u ah dadka lugaynaya, baabuurta iyo baarkinka baabuurka
- Biraha laisku rakibo in la diyaariyo gudaha dhismahana shaqada laga bilaabo



Bartamaha 2026



3. Duminta

- In la dhameystiro biraha laisku rakibayo
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha in loo dumiyo si taxadar leh oo marxaladaha kala duwan ah
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonaada



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luuqadaada booqo homes.vic.gov.au/information-in-your-language



Wixii su'aalo guud iimayl ugu dir:



enquiries@homes.vic.gov.au